

MAXAAN U BAAHANAHAY INAAN SAMEEYO?



Wixii DVO-yo ah oo la sameeyey

kahor: Waxaad dooran kartaa inaad dhaaciso DVO-gaaga waqti kasta si aad u hubiso inaad ku badbaadsan tahay wadanka oo dhan.

Waxaad tan ku samayn kartaa adoo ka codsanaya maxkamad kasta oo degaanka halka Australia ah. Maaha inay maxkamadu noqoto mid dawlad-goboleedka ama taritoriga ah halkaas oo amarkaaga laga baxshey.

Haddii aadan doonayn inaad u safartid ama aad degto dowlad-goboleed ama territori kale oo Australia ah waxaad dooran kartaa inaad sheegin amarkaaga. Waxaad ku sii badbaadsanaan doontaa dowlad-goboleedka ama taritoriga DVO laga baxshey.

Wixii DVOs ah oo laga baxshey

markii ama kadib: DVO-gaaga si toos ah ayaa looga aqoonsan yahay qaran ahaan lagama maarmaan maaha inaad qaado wax tallaabo dheeraad ah.



MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Haddaad hubin inaad u baahan tahay inaad tallaabo qaado, ama haddii aad qabto wax su'aalo dheeraad ah, ka eeg www.ag.gov.au/ndvos wixii macluumaad ah oo khuseeya dowlad-goboleedkaaga ama territorigaaga ama la xiriir maxkamadda deegaankaaga.

Waxaa muhiim ah in la ogaado in dhammaan awaamirtii rabshadda qoyska ee jirtey laguna bixiyey Victoria kahor 25kii Nofeembar 2017 ay si toos ah loo aqoonsaday marka la raaco Qorshaha Amarka Rabshadda Qoyska ee Qaraneed.

HIRGELINTA QARANEED

EE AMMARADA RABSHADDA QOYSEED

QORSHAHA AMARKA RABSHADDA
QOYSKA EE QARANEED
WAXAA LA SOO SARRAY



www.ag.gov.au/ndvos

Soomaali / Somali
National Enforcement of
Domestic Violence Orders
www.ag.gov.au/ndvos

HIRGELINTA QARANEED

EE AMMARADA RABSHADDA QOYSEED

ASALKA

Rabshada qoyska iyo guriga lama aqbali karo. Ammaanka dhibanaha waa lagama maarmaan.

Sharciyo cusub ayaa laga soo saaray dalka oo dhan si kor loogu qaado badbaadinta dhibanayaasha rabshadaha qoyska.

Waagii hore, amarrada rabshadaha qoyska (DVOs) waxay kaliya oo ay khuseeyeen dowlad-goboleedka ama taritoriga laga baxsdhey ama ka diiwaangashan yihiin.

Taasi hadda way isbaddeshey.

25ka Nofeembar 2017, Qorshaha Amarka Rabshadda Qoyska ee Qaraneed wuu bilowday. Dhammaan DVO-yada la soo saaray 25 Nofeembar 2017 hadda si toos ah ayaa qaran ahaan loogu aqoonsan yahayoo loo-hirgelinayaa.

BADBAADINTA DHIBANEYAASHA

Qorshaha Amarka Rabshadda Qoyska ee Qaraneed wuxuu xoojiyaa badbaadinta dhibanayaasha iyo qoysaskooda.

Uma baahnid inaad dib u codsatid inaad ka diiwaangeliso DVO-gaaga dowlad-goboleed ama territori kale oo Australiya ah si loo hirgeliyo.

Haddii aad haysato DVO hadda socda oo la soo saaray 25kii Nofeembar 2017 waxay noqon kartaa mid qaran ahaan loo aqoonsan yahay adoo ka codsanaya maxkamad.

Maxkamadaha deegaanka ee Australia oo dhan ah waxay beddeli karaan DVO qaran ahaan loo aqoonsan yahay iyadoon loo eegin meesha laga baxshey.

Booliska deegaanka ayaa wali hirgelin doona shuruudaha dhammaan DVO-yada laga baxshey dowlad-goboleedkooda ama taritorigooda, iyadoon loo eegayn markii la baxshey.

Sharciyadii dawlad-goboleedka iyo territoriyada ee jirey oo badbaadinaya dhibanayaasha iyo xubnaha qoyska ee dhibaataadu ka soo gaartay rabshadaha qoyska lama beddelin.



HIRGELINTA DVO-YADA

Waa dembi jariimo ah haddii aadan u hogaansamin shuruudaha DVO.

DVO ma ahan mid ku xaddidan xuduudaha dowlad-goboleedka ama taritoriga. Dhammaan DVO-yada la soo saaray ayaa lagu dabaqayaa dhammaan Australia oo dhan.

HALKAN DOWLAD-GOBOLEEDKAAGA AMA TERRITORIGAAGA DVO WAXAA LAGU MAGACAABI KARAA AMARKA FARAGELINTA, AMARKA RABSHADAHAA QOYSASKA, AMARKA RABSHADDA GURIGA EE LA-XADIDEY AMA AMARKA BADBAADINTA.

WAXAAN HADDA SI WACAN U
BADBAADIN KARNAA DAKA AUSTRALIA
www.ag.gov.au/ndvos